

## Haddii aad ka soo cabato Boliiska waxaad filan doontaa...

- » in cabashadaada la qaabilo si daranna loo eego
- » in laguula dhaqmo si xushmad iyo ixtiraam leh
- » inaan lagu takoorin
- » inaad su'aalo weydiiso iyo in jawaabo waxtar lehna lagu siiyo
- » in cabashadaada loo baaro si dhammaystiran oo aan eex lahayn
- » in lagu siiyo adeegga turjumaanka haddii loo baahdo
- » in lagu sheego habraaca wax-ka-qabashada cabshadaada
- » in la diiwaangeliyo cabashadaada.



Ujeedada Boliiska waa inuu mar kasta bixiyo adeeg heer sare ah hase ahaatee, haddii wax qaldamaan waxaan doonaynaa inaad noo soo sheegto.

# Sidee baa cabasho looga sameeyaa Boliiska

### Wixii macluumaad dheeraad ah iyo koobiga foomka cabashada

- ka eeg website-ka Boliiska oo ah [www.police.govt.nz/complain](http://www.police.govt.nz/complain)
- weydiiso saldhigga Boliiska ee degaankaaga
- kala xiriiir IPCA (0800 503 728 ka [www.ipca.govt.nz](http://www.ipca.govt.nz))

## Sida ay cabashadaadu u caawin kartaa Boliiska

Samaynta cabashada waa hab muhiim u ah Boliiska si loo hagaajiyo tayada adeegga Boliisku bixiyo, iyo asluubta shaqsiga shaqaalaha Boliiska ah.

### Goorma ayaa la caban karaa

Waa inaad ka cabataa haddaad aaminsan tahay:

- » in Boliisku ay qalad sameeyeen
- » inaan Boliisku kuula dhaqmin si caddaalad ah
- » inaad ku faraxsanayn adeegga aad heshay.

Waxaad ka caban kartaa:

- » xad gudubka Boliiska
- » dayacidda waajibka Boliiska
- » falalka, qorsheyaasha iyo habraacyada Boliiska
- » heerka adeega aad heshay.

## Sidee looga cabtaa Boliiska?

Waxaad samayn kartaa mid ka mid ah labadan nooc ee cabashada ah:

### Muujiinta in aadan ku faraxsaneyn:

Xaaladaha aan aad u darnayn sida adeegga oo aadan ku faraxsanayn aad ka heshay Boliis kaas oo aad doonayso inaad ka hesho sharraxaad.

Muujiinta ah in aadan ku faraxsaneyn waxaa wax ka qabta boliiska degaankaada, kuwaas oo kula shaqayn doona si ay wax uga qabtaan dareenkaaga.

### Cabashada rasmiga ah:

Hab madax-bannaan oo wax looga qabanayo dareennada daran:

- » Shaqaale Boliis oo xadgudba ama daayaca waajibkiisa
- » qorshaha, habraaca ama falka Boliiska New Zealand
- » heerka adeegyada oo aad heshay.

## Sida loo sameeyo muujinta ah inaad

- » Kula xiriir boosto ama taleefoon saldhig Boliis oo kasta ama qof ahaan ugu tag. Warqad u qor ama afka kala hadal sarkaalka heeganka ka ah saldhigga Boliiska ama nagala soo xiriir [www.police.govt.nz/complain](http://www.police.govt.nz/complain)

## Sida loo sameeyo cabasho rasmi ah

- » Waxaad tagtaa saldhig Boliis oo kasta una sheeg inaad doonayso inaad ka cabato Boliiska.
  - Haddii aadan awoodin ama aad ka warwareegayso inaad cabasho ka samayso saldhigga boliiska, qorshe ayaa lagu samaynayaa oo ah in meel kale laguugu wareysto.
  - Waxaa kuu furan inaad keensato qareenkaaga, saxiibkaa ama qaraabadaada markaad samayso cabashadaada.
- » Ka samee cabashada Boliiska ku saabsan adoo isticmaalaya website-ka Boliiska oo ah [www.police.govt.nz/complain](http://www.police.govt.nz/complain)
- » Warqad u dir Taliyaha Boliiska Degmada ee degaankaaga. Faahfaahintooda waxaa laga heli karaa white pages ee buugga taleefanka ama website-ka Boliiska oo ah [www.police.govt.nz/complain](http://www.police.govt.nz/complain)
- » Toos ugu qor Kumaasaariyaha Boliiska cinwaanka ah Police National Headquarters, PO Box 3017, Wellington 6140.
- » La xiriir Haya'dda Asluubta Boliiska ee Madax-bannaan (IPCA):
  - cabasho ka same intarneedka oo ah [www.ipca.govt.nz](http://www.ipca.govt.nz)
  - taleefan lacag la'aan ah u dir **0800 503 728**; ama
  - warqad u dir IPCA cinwaanka PO Box 5025, Wellington 6145; ama
  - cabashadaada email ugu dir IPCA [enquiries@ipca.govt.nz](mailto:enquiries@ipca.govt.nz)
- » La hadal ama warqad u qoro xildhibaankaada ee kuu fadhiya Baarlaamaka.